



Date: 12 / 11 / 2019

War-Saxaaafadeed

Dowladda Federaalka Soomaaliya, waxay shacabka Soomaaliyeed iyo beesha caalamka ku war-gelinaysaa in fatahaadihii Webiyada Jubba iyo Shabeelle oo hoos u dhac ku yimid, hadii roobab yimaadana weli cabsida fatahadaha meelaha qaar wey jirtaa.

Dowladdu, waxay mahad celin balaaran u jeedinaysaa ganacsatada Shacabka Soomaaliyeed ee ku nool dalka iyo dibadda gurmadka xoogga leh oo ay u fidiyeen walaalahooda ku wax yeeloobay daadadka ku soo rogmaday iyo fatahadaha webiyada.

Sidoo kale,Dowladdu waxay marlabaad umahadcelinaysaa Dowladaha saxiibada caalamka ee gurmadka fatahadaha ka gaystay gacan wayn.

Gurmadka loo fidinayo shacabka Soomaaliyeed ee fatahaaduhu saameeyeen wuxuu u socdaa si habsami leh, waxaana laga gaaray guulo lataaban karo muddo kooban.

Dwladda soomaaliya waxay rajo weyn ka qabtaa inuu si guul ah ay ku soo gaba gabooaan labadii weji ee hore qorshii ay dejisay dowladu ee afarta weji ahaa inkastoo ay dadku ay u baahanyiihin caawin ilaa inta ay dib uga soo ceshanayaan noloshoodii.

Sidoo kale waxaa hada bilaabmaya wejigii sadexaad in dib ugu celin dadka barakacay guryahoodii iyo dayactirka iyo dib u hawlgelinta goobihii adeega Bulshada sida iskuuladii, goobihii Caafimaad iyo wixii la mid ah.

Waxaa hada bilaabmaya wejigii sadexaad iyo kii afraad ee Qorshaha, sidaas awgeed, Dawladdu waxay Shacabka Soomaaliyeed, Ganacsatada iyo Dawladaha Saaxiibka la ah Soomaaliya waxaanu ka codsanaynaa in ay sii wadaan Gurmadka iyo Taakulada la gaadhsiinayo dadka ay roobabka iyo Fatahadu wax yeeleeyeen.